



# Andiswa xidig kubadda cagta

✎ Eden Daniels

🔗 Eden Daniels

💬 Abdikadir Abdullahi Ali, Omar Abdi Yare, Mohamed Shukri Sheikh, Sahal Ahmed Bashir, Abdi Mohmed Warsame, Salat Abdi Msulwa, Mohamed Abdi Sheikh

💬 somaliska

📊 nivå 2





Andiswa waxay daawatay wiilal kubadda cagta ciyaarayo. Waxay rajeysay in ay awoodi laheyd in ay ku biirto ayaga. Waxay weydisay tawabaraha in ay tawabar laqadani karto ayaga.



Tawabaraha gacmihiisa ayuu saartay simihiisa. “Isuulkan, wilasha kaliya ayaa loo ogolyahay in ay ciyaaraan kubada cagta”, ayuu yidhi.



Wiilasha ayaa u sheegeen in ay aado oo ay ciyaarto kubada gacanta. Waxey dhaheen kubadda gacanta waa gabdhaha Kubadda cagta na waa wilasha. Andiswa waa ay ka xumaatay.



Maalinka xigay, iskuulki ayaa lahaa ciyaar weyn o kubada cagta ah. Tawabaraha waa uu walwalsanaa sababtoo ah ciyaaryahankiisi ugu wanaagsanaa ayaa xanuunsaday mana uusan ciyaari karin.





Andiswa waxa ay ku oroday tawabarihi waxa ayna ka bariday in uu u ogolaado ciyaarta. Tawabaraha ma uusan hubin wax uu sameeeyo. Kadib waxa uu goaansaday in Andiswa ku biiri karto kooxda.



Ciyaarta waxa ay aheyd mid adag. Qofna gool ma dhalinin ilaa kala badhki waqtiga ciyaarta.



Wagtigi qeybta labaaad ee ciyaarta mid kamid ah wiilashi ayaa Andiswa u gudbiyay kubaddi. Waxay ugu dhaqaaqday si degdeg leh xagi birta goolka. Si adag bey u laaday kubbadi waa ayna dhalisay goolkii.





Dadki badnaa waxay la dhaceen farxad saaid ah, Ilaa maalinkaas, gabdhaha na waa loo ogoladay in ay ciyaaraan kubada cagta ee iskuulka.



# Sagor för barn på svenska

[berattelser.se](https://berattelser.se)

## Andiswa xidig kubadda cagta

Skriven av: Eden Daniels

Illustrerad av: Eden Daniels

Översatt av: Abdikadir Abdullahi Ali, Omar Abdi Yare, Mohamed Shukri Sheikh, Sahal Ahmed Bashir, Abdi Mohmed Warsame, Salat Abdi Msulwa, Mohamed Abdi Sheikh

Denna saga kommer från African Storybook ([africanstorybook.org](https://africanstorybook.org)) och vidarebefordras av Sagor för barn på svenska (<https://berattelser.se/>), som erbjuder sagor på många språk som talas i Sverige.

Detta verk är licensierat under en Creative Commons [Erkännande-IckeKommersiell 3.0 Internasjonal Lisens](https://creativecommons.org/licenses/by-nc-sa/3.0/).